



Xaquuqda Waalidka iyo Cunuga aay ku Leeyahiin Wax-barashada Khaaska ah

Ogeysiiska, Ilaaliyayaasha Nidaamka aay Dacwadu u socoto

Sharaxaada, ilaaliyayaasha habka aay dacwadu u socoto waxuu diyaar u yahay waalidka heysta ciyaalka dhiman sida ku hoos xusan Sharciga Wax-barashada shaqsiyada dhiman (IDEA) iyo Sharciga Wax-barashada Colorado ee ku aadan ciyaalka aan caadiga aheyn. (ECEA)

IDEA iyo shuruucda Colorado ee maamulka ECEA ga waxuu ubaahanyahey in aay iskuulada siiyaan waalidka cunuga dhiman wargalin ka kooban sharaxaada buuxda ee ilaaliyayaasha nidaamka aay hoowshu u socoto ee diyaarka ku ah sharciga IDEA ga iyo sharciyada khuseeya. Ogeysiiskan waxaa lagu siindoonaa hal mar sanadkii. Waliba, koobi ayaa lagu siindoonaa:

1) Marka koowaad ee la soo gudbiyo cunugaaga ama la codsado in la qiimeeyo cunugaaga waxaa lagu siin koobi. 2) Marka la helo cabashada koowaad ee goobalka iyo marka koobaad ee u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka sanad dugsiyeedka dhaxdiisa. 3) Hadii go'anka la gaaro si loo qaado fal edbin ah kaas oo ku keenaya boos badal cunugaaga; iyo 4) markaad codsato, afartaa goorba waxaad heleysaa koobiga warqadan.

Morgan County School District Re-3 waa maamulka kaliya ee masuul ka ah siinta adeegyada wax-barashada khaaska ah cunugaaga, xubno shaqaale adeegyo isku dhafan ayaa diyaar u ah inaay kugu caawiyaan inaad fahanto ilaaliyayaasha habka aay hoowshan u socoto. Hadii aad qabto wax su'aal ah oo kusaabsan waxyaalaha uu ka koobanyahay ogeysiiskan ama aad jeceshahay akhbaar dheeraad ah fadlan kala xiriir xafiiska adeegyada khaaska ah ee dagmada (970) 370-6130.

Akhbaarta Guud

Wax-barasho loogu talagalay dadweynaha oo Lacag la'aan ah

Sharciga IDEA, ciyaalka uqalma ee dhiman waxaa lagu siiyey wax-barasho loogu talagalay dadweynaha oo lacag la'aan ah ("FAPE"). FAPE macnaheedu waxaa weeye wax-barasho khaas ah iyo adeegyo la xiriira kuwaas oo buuxinaya heerka caadiga ah ee waaxda wax-barashada Colorado (CDE). Ogolow Barnaamijka Wax-barasho shaqsiyedka ah ee cunugaaga ("IEP"). Taas oo cunugaaga lacag la'aan lagu siindoono, laguna kormeerayo, oo laguna hagayo lacag la'aan. Xaqbaad u leedahey inaad ka qeybgasho kulamo xushmo leh oo lagaga hadlayo aqoonsiga, qiimeynta iyo geeynta fasal ku haboon cunugaaga iyo siinta cunugaaga FAPE.

Ogeysiiska qoraalka ah ka hor (PWN)

Waxaad xaq u leedahay inaad ka hesho degmada ogeysiis qoraal ah wakhti macquul ah ka hor:

1) Qorshayaasha lagu bilaabay ama lagu badalayo aqoonsiga, qiimeynta iyo geeynta fasal cusub cunugaaga ama siinta cunugaaga FAPE. 2) Diidmooyinka in la bilaabo, ama la badalo aqoonsiga, qiimeynta, fasal cusub geeynta, ama siinta FAPE cunugaaga. Ogeysiiskan waa in lagu qoraa luuqada aay fahmayaan dadweynaha guud ahaan waana inaay ku jirtaa kuwan:

- 1) Sharaxaad wax-qabadka la soo jeediyay ama la diiday;
- 2) Sharaxaad sababta wax-qabadka loo soo jeediyay ama loo diiday;
- 3) Sharaxaad nidaamka qiimeyn kasta u socoto, diwaanka ama war-bixinta lagu saleeyay wax-qabadka la soo jeediyay ama la diiday;
- 4) Qoraal sheegaya inaad ku heysato ilaalin sharciga ilaaliyayaasha nidaamka aay hoowshu u socdo ee sharciga wax-barashada khaaska ah, iyo hadii uusan aheyn ogeysiisku gudbintii koowaad ee qiimeynta, tan macnaheedu waxay tahay in waalidka la siiyo koobi qeexaya sharciga ilaaliya habka uu nidaamku u socdo;
- 5) Illo ama meelo aay tahay inaad la xiriirto si aad u hesho kaalmo aad ku fahanto siinta wax-barashada khaaska ah.
- 6) Sharaxaada fursadaha kale oo aay tixgalisay kooxda IEP da iyo sabaabaha fursadahaas loo diiday.
- 7) Sharaxaad la xiriirta waxyaalaha keenay in qorshaha la soo jeediyo ama la diido.

Ogeysiiskan waa lagu siindoonaa asaga oo lagu qoray luuqadaad u dhalatay, ilaa aay cadaato inaan la yeelikarin in luuqadaada lagugu fasiro ogeysiiskan. Hadii aay luuqadaada aay tahay luuqad aan wali la qorin, degmada ayaa xaqiijindoonta (kadibna joogteyndoonta cadeyn qoraal ah) in ogeysiiska laguugu turjumay afka (ama siyaale kale) aadna fahantay waxyaalaha uu ka koobanyahay ogeysiisku.

Ogolanshaha Waalidka

Degmadu waa inaay sameeyso dadaal macquul ah si aay u hesho ogolanshahaga oo qoraal ah ka hor intaan la sameynin qiimeynta koowaad si loo go'aamiyo u qalmida cunugaaga adeegyada wax-barashada khaaska ah, siinta wax-barashada khaaska ah iyo adeegyada la xiriira ka hor, iyo dib u qiimeynin kasta oo lagu sameeyo cunugaaga ka hor. "Fasax qoraal ah oo **wargalin**" macnaheedu waa:

1. Si buuxda ayaa lagugu sheegay luuqadaad u dhalatay dhamaan akhbaarta la xiriirta wax-qabadka ogolanshaha lagaga radinaayo si loo sameeyo.
2. Qoraal aad ku ogolaatay wax-qabadka, warqada dusheed taas oo sharaxeeysa wax-qabadka iyo (hadeey ku khuseeyso) liistada diwaanada la bixiyay iyo qofka la siiyay.
3. Fasaxaagu waa tabarucaad waana la jabinkaraa wakhti kasta. Ogoow, sikastaba ha ahatee, in ka noqoshadaada ogolanshaha aanu inkirikarin wax-qabad kasta oo dhaca kadib markaad bixiso ogolanshaha kana horeysa wakhtigaad la laabatay ogolanshahaaga.

Qiimeynta koowaad: Ogolanshahaga qiimeynta koowaad macnaheedu ma ah inaad xataa siisay ogolansho degmada si aay u bilaawdo siinta wax-barashada khaaska ah iyo adeegyada la xiriira cunugaaga.

Hadii aad diido ama aad ku guul dareeysato inaad ka jawaabto codsiga ogolanshaha qiimeynta koowaad, degmadu waay sii wadikartaa laakin looma bahno inaay siiwado dhaxdhaxaadin ama dhageeysiga u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka si aay u fuliso qiimeynta. Degmadu ma jabinin waajibaadkeedii ahaa inaay meeleyso, aqoonsato. Kadibna qiimeyso cunugaaga, hadii aay ku diido inaay ku siiwado qiimeynta koowaad noocan.

Siinta koowaad ee adeegyada: Degmadu waxay sameyndoontaa dadaal macquul ah si aay u hesho ogolanshahaga ka hor inteyna siinin wax-barashada khaaska ah iyo adeegyada la xiriira cunugaaga wakhtiga koowaad. Hadii aad ka jawaabiweydo ama aad diido inaad bixiso ogolanshaha, degmadu ma sii wadidoonto dhaxdhaxaadinta ama dhageeysiga u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka si qasab looga dhigo in la siiyo cunugaaga adeegyada koowaad. Hadii aad ka jawaabiweydo ama aad diido inaad bixiso ogolanshaha siinta cunugaaga adeegyada koowaad. Degmada loogama bahno inaay iskugu yeerto kulan IEP ah ama oogu sameeyso IEP cunugaaga, degmada loogama bahana inaay diyaar ooga dhigto cunugaaga FAPE da.

Dibuqiimeynaha: Degmadu ooma bahana ogolanshahaga si aay u fuliso dibuqiimeynta, hadii aay sharixikarto inaay qaaday heer macquul ah si aay u hesho ogolanshahaga aadna ku guul dareeysatay inaad ka jawaabto. Hadii aad diido inaad bixiso ogolanshaha, degmada waay sii wadikartaa, laakin loogama bahno inaay sii wado dhaxdhaxaadin ama aay sii wado dhageysiga u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka si aay u hesho awood aay ku fuliso dibuqiimeynta. Degmadu ma'eeyna jabinin waajibadkii uu saaray sharciga IDEA hadii aay degmadu diido inaay sii wado dibuqiimeynta dhaxdhaxaadin ama sii wadidii dhageysiga u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka.

Ogolansho iskuul gaar loo leeyahay ama ciyaalka guriga wax lagu baro: hadii aad cunugaaga ka diwaangalisay iskuulka si khaas ah loo leeyahay kharashkana aad adigu bixinayso, ama guriga wax lagu baro cunugaaga, aadna ku guul dareeysatay inaad ka jawaabto codsiga ama aad diiday inaad bixiso ogolansho qiimeynta koowaad iyo dibuqiimeynta, degmadu kuma sii wadidoonto qiimeynta dhaxdhaxaadin ama ma sii wadidoonto dhageysiga u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka. Xaaladaha saas oo kale ah, degmada loogama bahna inaay u citiqaadiso cunugaaga inuu uqalmo helida adeegyo cadaalad ah, (Tusaale ahaan adeegyada loo diyariyey waalidka geeyay ciyaalkood dhimana iskuul khaas loo looleeyahay.

Bixinta Ogolaanshaha Kale: Ogolaanshahaga looma baahna si dib loogu fiiriyo warbixin horay loo diyaariyay oo ah qiimeyn ama dibuqiimeyn, xataa looma bahno in cunugaaga laga qaado imtixaan ama qiimeyn laga qaado ciyaalka dhan, ilaa looga baahanyahay ogolanshaha imtixaanka/qiimeynta waalidka ciyaalka dhan. Degmadu ooma isticmaalidoonto diidmadaada aad diiday ogolanshaha hal adeeg ama wax qabad ineey adiga iyo cunugaaga ugu diido adeegyada, wax-taryada, iyo wax-qabadyada kale.

Dadaalada macquulka ah: Degmadu waa inaay joogteysaa diwaanada dadaalkeeda aay ku radinayso helida ogolanshahaga qiimeynta koowaad ee cunugaaga, siinta adeegyada wax-barashada khaaska ah ee koowaad iyo dibuqiimeynta kadibna la meeleyo cunugaaga, hadii cunugaagu uu gobalku hayo oo uuna adiga kula nooleyn. Diwaanadu waa inaay ku jiraan diwaanka isku dayada aay degmadu iskugu dayaaysay inaay ku hesho ogolanshahaga,

- 1) Diwaano sharaxan oo ah wacitaamo la sameeyay ama la isku dayey iyo jawaabaha khuseeya.
- 2) Koobiyada warqadaha lagu diray iyo jawaabaha la helay
- 3) Diwaano faahfaahsan oo ah booqashooyinkii lagu sameeyay gurigaaga ama meesha aad ka shaqeeyso iyo jawaabaha khuseeya.

Qiimeynaha madaxa banaan ee wax-barasho: hadii aad diido qiimeynata aay degmadu heshay, waxaad xaq u leedahay inaad u codsato cunugaaga qiimeyn wax-barasho oo madax-banaan (IEE) oo lacag la'aan ah. IEE da waa qiimeyn uu fuliyo imtixaame aqoon leh kaas oo aan u shaqeynin iskulka degmada ee masuulka ka ah wax-barashada cunugaaga. Markii la helo codsigaaga, degmadu waxay heeysataa jaanis aay ku siiso cunugaaga IEE lacag la'aan ah ama aay sii wado dhageysiga u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka si aay u tusto in aay qiimeynteedu ku habooneyd cunugaaga. Degmadu xataa waxay ku weeydiin sababta aad u diiday jawaabta qiimeynta aay heshay. Si kastaba h ahaatee, degmada loogama baahna sharaxaad si aan macquul aheyna uma daahineyso siinta cunugaaga IEE lacag la'aan ah ama Qorashada codsi u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka.

Hadaay degmadu eeyna codsanin dhageysi, waxaay ku siindoontaa akhbaarta meesha aad ka helikarto IEE iyo karateeriyo kasta oo degmada, taasoo aay ku jirto meesha aay qiimeynta iyo aqoonta imtixaanaaha, aqoontaas oo khuseysa IEE. Heerka inaay Karateeriyadan aay joogtaynayso xaquuqdaada aad u leedahay inaad hesho IEE, waa inaad raacdaa ayaga. Karateeriyadan la'aanteed, degmadu ma amri karto Xaalado ama wakhti habeysan oo la xiriira sidii cunugaaga loogu helilahaa IEE lacag la'aan ah.

Hadii degmada codsato dhageysi, kadibna go'aanka kama dambeeysta ah uu yahay inaay qiimeynteedu ku habooneyd cunugaaga, wali Xaqbaad u leedahay IEE, laakin lacag la'aan ma ah. Hadii aad ku heshay IEE da lacag ama lacag la'aan, degmadu waa inaay citiqaadisaa go'aanka IEE kasta taas oo buxisa karateeriyada degmada. IEE da waxaa xataa loo soo jeedinkaraa cadeyn ahaan dhageysiga u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka, hadii uu codsado xaakinka dhageysiga IEE inaay ka mid noqoto dhageysiga maxkamada, kharashka qiimeynta waa in uu noqdaan lacag la'aan.

Ogeysis lagu dirayo Email

Hadii aay degmadu u soo bandhigto waalidka in u ku helo warqadaha email, waad doorankartaa inaad ku hesho email kuwan soo socda

- 1) Ogeysis qoraal ah oo horay loo qoray; 2) Ogeysiiska, Ilaaliyayaasha habka nidaamku u socdo; 3) iyo ogeysiis kasta oo la xiriira u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka.

Gudbinta Xuquuqaha Cunugaaga Da diisa Owgeed Ilaa cunugaaga loogu cadeeyo si sharci ah inuusan karti laheyn, dhamaan xaquuqda uu ku siiyey sharciga IDEA waxaa ku wareegi cunugaaga markuu gaaro 21 sano. Xaquuqdan waxaa ku jira, laakin kuma cayimno, Ogolanshaha qiimeynta ama dibuqiimeynta, go'amada khuseysa adeegyada ama meeleynta, iyo xuquuqaha wax-barashada khaaska ah iyo cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka. Degmadu waa inaay idiin sheegto kala wareejinta Xaquuqdan adiga iyo cunugaagaba ka hor ugu yaraan hal sano intuusan cunugaagu gaarin 21 sano. Waa in aay ku jirtaa cunugaaga IEP disa (Barnaamujka wax-barasho ee shaqsiyeed) warqada sheegeysaa in cunugaaga loo sheegay inaay masuuliyada xaquuqda asaga ku soo wareegidoonto markuu gaaro 21 sano.

Geenta Cunugaaga Iskuulka gaar loo leeyahay Markaay arintu khuseeyso FAPE da

Hadii aad doorato inaad ka diwaangaliso cunugaaga, kaas oo horay uga helay iskuulada wax-barasho khaas ah iyo adeegyada la xiriira ama iskuul gooni loo leeyahay, ogolanshaha degmada ama soo gudbinta degmada la'aanteed, degmada waxaa looga baahanyahay inaay kuu magdhawdo kharashka diwaangalinta ee aad ku bixisay iskuulka gaarka loo leeyahay, kaliya hadii aay degmadu ku guul dareeysato inaay u diyaariso cunugaaga FAPE wakhtigaas aad cunugaaga iskuulka gaarka loo leeyahay aad ka diwangalineysay eeyna tahay diwaangalinta gaarka ah mid ku haboon cunugaaga. Galinta cunugaaga iskuul gaarka loo leeyahay waxaa la arkikaraa mid ku haboon, xitaa haduusan iskuulka buuxinin heerka wax-barasho ee Iskuulada Degmooyinka Colorado.

Khilaafka khuseeya diyaarahaanta FAPE iyo su'aalaha magdhowga kharashka waxay ayidsanyihiin sharciga IDEA ee cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka, kharashka magdhowga waa la yareyn ama la diidi hadii:

- 1) Kulankii IEP ga ee ugu danbeeyey ee aad ka qeybgashay wakhtigii aad ka bixineysay iskuulka degmada ee lacag la'aanta ah aadan u sheegin kooxda IEP inaad diidantahay qorshaha uu iskuulka degmadu uu ku geeyay wax-barashada khaaska ah cunugaaga, oo aad ku sheegtay inaad rabto inaad ka diwaangaliso cunugaaga iskuul gaar loo leeyahay aadna rabto inaay degmadu kaa bixiso kharashka; ama
- 2) Ugu yaraan toban maalmood ka hor intaadan ka saarin cunugaaga iskuulka degmada, inaad ku ogeysiinin iskuulka degmada inaad rabto inaad cunugaaga ka saarto iskuulka aadna rabto in kharashka lagaa bixiyo.

Kharashka magdhowga xataa waxaa laga yaabaa in la yareeyo ama la diido hadii la ogaado in aad cunugaaga iskuulka ogasaartay si aan macquula aheeyn, iyo hadii markii aad cunugaaga ka saareysay iskuulka degmada aay degmadu kuu sheegtay si qoraal ah inaay rabto inaay qiimeeyso cunugaaga si aay u geeyso wax-barasho ku haboon, laakin cunugaaga la waayay si loo qiimeeyo.

Kharashka magdhowga lama yareeyndoono ama lama diidoono hadii aay degmadu kaa celisey inaad bixiso ogeysiis aad ku sheegeysid inaad rabto inaad ka saarto cunugaaga iskuulka; hadii aayna degmadu kula socodsiihin baahida inaad keento ogeysiis; ama bixinta ogeysiiska aay dhib u geysanayso cunugaaga. Maxakamadu waxaay ikhtiyaar u leedahay inaay cafido rabitaanka ogeysiiska hadii uu waalidku qorina karin akhriyina karin Englishka; ama raacida ogeysiisku aay dhib khatar ah oo xaga maskaxda ah aay ku keenayso cunugaaga.

Diwaanka Ardeyga

Helida Diwaanada ardeyga

Waxaad xaq u leedahay inaad baarto dibna u eegto diwaanada wax-barasho ee cunugaaga. Xuquudan waxaa ku jira diwaanada laga soo uruuriyay ama aay degmadu isticmaashay ayada oo tixgalinaysa sharciga IDEA, waxaa ku jira diwaanada la xiriira aqoonsiga, qiimeynta iyo geeynta cunugaaga wax-barasho ku haboon iyo siinta cunugaaga FAPE,

Degmadu waa inaay adeeco codsiga waalidka ee ah inuu baro diwaanada ardeyga daahin la'aan iyo ka hor intuusan dhicin shir kasta oo ku saabsan IEP ama iyo dhageysiga kasta oo ah cabasho nidaamka xaquuq dhoowrka, kama soo wareegikarto 45 maalmood kadib markaad sameeysay codsiga.

Xaquuqda aad u leedahay inaad baarto diwaanada wax-barasho ee cunugaaga waxaa ka mid ah:

- Inaad ku hesho codsi liistada noocyada iyo meelaha diwaanada wax-barashada laga soo uruuriyay, joogteeyay, ama aay isticmaashay degmadu;
- Inaad ka hesho jawaab degmada codsiyaasha macquulka ah ee ku saabsan sharaaxadaha iyo turjumida diwaanada;
- Inuu wakiilkaagu baaro diwaanada; iyo

- Inaad hesho Koobiyada diwaanada, hadii aay ku guul dareeysato in lagu siiyo Koobiyada aay kaa horistaagayso xaquuqdii aad u laheyd inaad baarto aragtana diwaanada khuseeya cunugaaga.

Degmadu waxaay uqaadan in aad awood sharci ah u leedahay inaad baarto aragtana diwaanada la xiriira cunugaaga, ilaa lagu dhaho maya. Hadii diwaan aay ku jirto akhbaar ka badan hal ardey, waxaad xaq u leedahay inaad baarto akhbaarta la xiriirta ardeygaaga oo kaliya ama waxaa lagaga waramikaraa akhbaarta ardeygaaga oo kaliya. Degmadu kuma weydiinayso ajuuro si aad u baadhato ama aad u hesho diwaanada akhbaarta wax-barasho ee cunugaaga. Degmadu waay ku weydiinkartaa ajuuro koobiyaal diwaano lagugu sameeyay hadii aay ajuuradu kaa hor istaageynin xaquqdaada aad u leedahay inaad baarto aragtana feylasha ama diwaanada ardeygaaga.

Degmadu waa inaay xafidaa dadka ama ururada awooda u leh inaay baaraan arkaan diwaanada wax-barasho ee cunugaaga, magacyadooda, maalinta iyo qasadka dadkan ama ururadan loogu ogaaladay feylasha, diwanada ardeygaagu, degmadu ma keydinayso feylasha ama diwanda waalidka ama shaqaaalaha u qalma inuu baaro ama arko diwaanada iyo feylasha cunugaaga.

Saxida Diwanada

Hadii aad umaleynayso akhbaarta diwaanka wax-barasho ee cunugaagu inaaaysan saxaheyn, marinhabaabin ama inay jabinayso xaquuqda uu u leeyahay inaan akhbaartiisa la arkikarin ogolansho la'aan ama ku xad gudub xaquuqahiisa kale, waxaad ka codsankartaa dagmeda inay saxdo akhbaartaas. Degmadu waxaay leedahay wakhti macquul ah oo aay kaga soo jawaabto codsigaaga. Hadii aay degmadu go'aansato inaynan saxin akhbaarta, waa inay degmadu kuu sheegto go'aankeeda iyo xaq aad uleedahay inay maxkamad dhageysato aadna kula tartanto go'aanka ah inaynaixin akhbaarta cunugaaga.

Hadii go'aanka dhageysiga maxkamada oowgiis, degmadu aay go'aansato inay akhbaartu aayna sax aheyn, marinhabaabin ama jabinayso xaquuqaha kale uu cunugaaga, waa inay degmadu saxda akhbaarta aayna kuugu sheegtaa qoraal inay saxday. Hadii sikastaba ha ahatee go'aanka maxkamada oowgeed degmadu aay ogolaato inayna akhbarto sax aheyn, marinhabaabin ama aay ku xadgudbeyso xaquuqaha kale ee cunugaaga, waa inay kuu sheegtaa xaquuqda aad u leedahay inaad ku darto qoraal diwaanka ama feylka cunugaaga kaasoo ka hadlaya akhbaarta ama bixinayo sababta aad ugu gacanseeyrtay waxyaalaha uu ka koobanyahay diwaanka ama feylka cunugaaga. Degmadu waa inay xafido akhbaarta inta uu khilaafku jiro, hadii aay degmadu u bandhigto akhbaarta la'isku khilaafsanyahay qof ama koox sadexaad waa inay degmadu u bandhigto kooxda ama qofka sadexaad qoraalkaaga.

Daah ka qaadida Akhbaarta qofka lagu aqoonsankaro,

Degmadu waa inay qaado talaabo aay ku ilaalinayso akhbaarta ardeyga lagu aqoonsankaro oo aay ku xafido meel adag kana ilaaliso inay arkaan dad aan loogutalagalin ama inay baaba'aan, waa inay degmadu xaqiijiso inay dhamaan dadka aruurinaya akhbaarta inay sharciga fahansanyihiin dhoowraana dhamaan sharciyada dhoowra akhbaarta shaqsiyada. Degmadu waay joogteendoontaa baarista dadweynaha waxaana la diyaarindoonaa liistada magacyada iyo darajadooda shaqaalaha degmada ee fursad uleh inay arkaan akhbaarta ardeyga lagu aqoonsankaro.

Waa in lahelaa ogolanshahaaga ka hor inta aan la tusin koox ama dad loo ogalaaday inay arkaan akhbaarta ardeyga lagu aqoonsankaro, guud ahaan ogolanshahaaga looma baahna ka hor inta aan la tusin masuul xafiiseedyada wakaaladaha ka qeeybqadnaya akhbaarta ardeyga lagu aqoonsankaro hadafyada kulanka looga baahanyahay IDEA. Waxaa jira labo aan lagu darin baahidan: 1. Ogolanshahaaga waa in lahelaa ka hor inta akhbarta ardeyga lagu aqoonsankaro daaha looga qaadin masuul xafiiseedyada ka wakaaladaha ka qeybqadnaya oo bixinayo ama siinaya adeegyada kala guurka. 2. Hadii cunugaaga la diwangaliyo, ama loo dinwaangalinayo iskuul gaar ah kaas oo aan ku yaalin meesha iskuulka degmadu ku yaalo halkaas oo aad degantahay, waa in lahelaa Ogolanshahaga ka hor inta aan la siinin akhbaarta ardeyga lagu aqoonsankaro iskuulka khaaska loo leeyahay.

Baabi'inta Akhbaarta Ardevga Lagu Aqoonsankaro

Degmadu waa inaay kuu sheegto marka akhbaar ka mid ah akhbaarta ardeyga lagu aqoonsankaro aana loo bahneyn inaay bixiyaan adeegyada wax-barasho ee cunugaaga.

Akhbaarta waa in lagu baabi'yo codsigaaga. Ogoow si kastaba ha ahaatee, diwaanka ama feelka joogtada ah ee cunugaaga magaciisa, ciwaankiisa, telefoon nambarkiisa, heerkiis ama heerkeeda wax-barasho, diwaankeeda imaansho dugsiiyeed, heerka ama gareydhka aay dhameeysay iyo sanadlaha aay dhameeysay waxaa xafididona degmada wakhti aan xadidneeyn.

Dhaxdhaxaadin

Adeegyada dhaxdhaxaadinta oo lacag la'aan ah ayaa diyaar kuu ah si aay u xaliyaan khilaafka kasta oo ka soo baxa IDEA, oo aay ka midyahiin arimaha soo baxa ka hor wakhtiga aan la feeylgareynin u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka. Adiga iyo degmadu waa inaad ku heshiisaan dhaxdhaxadinta, ineen waxay ku saleysantahay Ikhtiyaarka labadiina e. Dhaxdhaxaadinta looma isticmaali karo inaay dib u dhigto ama eey beeniso xaquqdaada aad u leedahay u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka, ama ee beeniso xaquuq kale ee uu ku siiyay sharciga IDEA.

Hadii lagugu martiqaaday laakin aad rabto inadan ka qeybqaadanin dhaxdhaxadinta, degmadu waxa lagayaabaa inaay kugu deeqdo fursad aad kula kulanto wakhti iyo meel kasta oo adiga ku qancisa qof ka socda tababarka waalidka iyo xafiiska akhbaarta, xarunta bulshada ee waalidka ama urur kale oo kuhaboon kuwaas oo ku sharixikara faa'iidada dhaxdhaxadinta. Degmadu laga yaabe inayna dib udhigin ama beenin dhageysiga maxkamad hadii aad diido inaad ka qeybgasho kulamadaas.

Dhaxdhaxaadinta waxaa fulindoono dhaxdhaxaadiyaal u qalma oo dhaxdhaxaad ah oo loo tababaray dhaxdhaxaadin wax ku ool ah oo aqoon uleh citiqaadinayana sharciyada la xiriira siinta wax-barashada khaas ah iyo adeegyada la xiriira. CDE (Waaxda Wax-barashada Colorado) waxay joogteysaa liistada dhaxdhaxaa-diyayaasha cilmiga uleh aayna uqoondeeyso moorgeysi.

Dhaxdhaxaadiyayasha loo xil saaray dhaxdhaxadinta lagama yaabo inaay noqdaan shaqalaha CDE (Waaxda Wax-barashada Colorado) ama degmadaba mana lahaan karaan dano shaqsiyeed taas oo ka hor imaaneyso ujeedooda. Qofkii uqalma inuu u adeego

dhaxdhaxaadiye ahaan ma noqon karo mid aan uqalmin shaqadaas CDE (Waaxda Wax-barashada Colorado) oo lacag siisay si aay dhaxdhaxadinta ugu adeegaan owgeed.

Kulamada dhaxdhaxadinta waa in loo jidwalgareeyaa hab wakhtiyeeysan laguna qabtaa meel wada qancisa kooxaha kala duwan. Wadahadalada dhaca wakhtiga dhaxdhaxaadin socoto waa in la xifidaa loomana isticmaali karo cadeyn dacwooyinka isku dabaxiga. Hadii xal lagu gaaro dhaxdhaxadinta, kooxuhu waa inaay fuliyaan heshiisyada sida sharciga ah utaagan ku waas oo horay uwadaya go'aanada xalinta sheegayana in dhamaan wadahadalka lagu hadlay wakhtiga dhaxdhaxadinta in la xafidayo loona isticmaalidoonin cadeyn dhageysiga maxkamadaha isku daba xigxiga.

Waa inaay saxiixaan heshiis qoraal ah adiga iyo qofkasta oo awood uleh inuu degmada u go'aamiyo hoowsha.

Heshiiska dhaxdhaxadinta wuu ka fulikara maxkamada kasta oo leh karti wax xukumid.

Hababka cabashada Gobalka

Cabashooyinka goobalka oo ku lid ah cabashooyinka nidaamka xaquuq dhoowrista

Xeerarka IDEA (Sharciga Ardeyda ka Dhiman xaga Fahanka Wax-barashada) uu habeeyey habab kala duwan oo cabashooyinka gobalka ah iyo cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka. Qofkast ama ururkasta wuu qorankaraa cabasho uu kaga cabanayaan jabin shuruucda IDEA (Sharciga Ardeyda ka Dhiman Xaga Fahanka Wax-barashada) aay jabisey CDE (Waaxda Wax-barashada Colorado) iskuulka degmada , gudiga iskaashiga adeegyada wax-barasho, ama xeerka/sharciga iskuulka gobalka.

Adiga iyo degmada kaliya ayaa qorankaraa codsi u cabasho nidaamka xaquuq dhoowrka, maxkamaduna waxaay ku xadidantahay arinta la xiriirta qorshaha, ama diidmada in la bilaabo ama labadalo aqoonsiga, qiimeynta, geeynta wax-barasho ku haboon ama siinta FAPE (Wax-barasho Lacag la'aan ah oo ku haboon cunugaaga) cunugaaga.

CDE (Waaxda Waxbarashada Colorado) waa inaay ku xalisaa cabashooyinka gobalka lixdan maalmood. Xaakinku guud ahaan waxuu heystaa afartan iyo shan maalmood kabacdi dhamaadka sodonka maalmood ee la yirahdo wakhtiga xalinta (fiiri hoos) si uu u fuliyo dhageysiga uuna u soo saaro go'aan qoraal ah. Cabashada gobalka iyo u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka waxaa si buuxda loogu qeexay hoos.

Qorashada Cabasho Gobal

Hadii aad qorato cabasho gobal, cabashadaadu waa inaay sharaxdaa sida degmadu aay u jabisey sharciga IDEA ama hirgalinteeda shuruucada kadib lagudaraa runta uu qoraalkan ku saleysanyahay; waa inaad kudartaa magacaga iyo akhbaarta lagaala soo xiriirikaro.

Hadii dacwadaadu aay la xiriirta cunug khaas ah, waa inaad cabashadaada ku dartaa (1) magaca iyo ciwaanka uu cunuga daganyahay iyo iskuulka uu cunugu dhigto (hadii uu cunugu uu yahay guri la'aan, qor akhbaarta jirta ee lagala xiriirikaro cunuga iyo magaca iskuulka uu cunugu dhigto; (2) sharaaxada nooca u yahay dhibku, adiga oo ku daraya runta la xiriirta dhibka, iyo (3) xalka la qorsheeyay ee dhibka heerka ugu sareeya ee la ogyahay wakhtiga aad qoreysey cabashada.

Cabashadaadu waa inaay ka andacooneyso sharci jabin dhacday wakhti aan ka badneyn hal sano taariikhda aay heshay CDE kadibna waa inaad u dirtaa koobi laanta aad ka cabaneyso inaay jabisey sharciga IDEA.

Cabashooyinka ka cabanaya ku guul dareysiga hirgalinta go'aanka maxkamada waxaa xalin CDE.

Hadii aad heyso wax su'aal ah oo la xiriirta Qorashada cabashada ama aad u bahantahay akhbaar dheeraad ah, fadlan la xiriir hogaanka CDE da ee qeybta ardeyda ka duwan ardeyda kale ee (303) 866-6694.

Baadhitanka Cabashada Gobalka iyo nidaamyada xalka

CDE waxay heystaa lixdan maalmood kadib markii loo qorto cabashada:

1. Inaay CDE du sameeyso baadhitaan madaxbanaan hadaay umaleyso inuu muhiimyahay.
2. Inaay ku siiso fursad aad ku soo gudbiso akhbaarta dheeradka ah oo ku saabsan eedeynaha ku jira cabashada.
3. Sii degmada fursad aay kaga jawaabto cabashada, aay ka midtahay fursad aay kugu soo jeediso xalka dhibka iyo ogolanshahaga si aay u wajahdo dhaxdhaxaadin.
4. Inaay dib ufiiriso dhamaan akhbaraha la xiriira aayna sameeyso go'aan madaxbanaan oo ah in sharciga IDEA la jabiyay iyo inkale.
5. Inaay u soo saarto go'aan qoraal ah kooxaha aay khuseeyso uu lagu sheegay cabashada, go'aankaas oo ka kooban akhbaarta runta ah ee la helay iyo gunaanadka iyo sababta go'aanka kama danbeysta ah.

CDE waay siyaadindoontaa lixdanka maalmood ee laxadiday kaliya haaday jiraan xaalad aan caadi aheeyn ama kooxuhu aay si tabarucaad ah iskugu raaceen saa'idinta si arinta loogu xaliyo dhaxdhaxaadin ama micna kale oo xaliya khilaafka.

Xalinta cabashada gobalka taas oo CDE ogaatay in lagu guul dareeystay in la siiyo adeegyo ku haboon, CDE waxaay soo saaridoontaa go'aan sheegaya: (1) guul dareysiga in la siiyo cunuga adeegyo ku haboon, aay ka midtahay ficil sax ah oo lagu sheegayo baahida cunuga; iyo (2) siinta mustaqbalka adeegyada ku haboon dhamaan ciyaalka ka dhiman xaga fahanka wax-barashada.

Cabashada gobalka ee la xiriira dhageysiga nidaamka xaquuq dhoowrka

Hadii cabashada gobalka la helo taas oo ah mida keentay dhageysiga nidaamka xaquuq dhoowrista ama aay ka koobantahay moowduucyo badan oo aay mid ama ka badan aay ka midyahiin dhageysiga,

CDE waa inaay iska deyso qeyb kasta oo ka mid ah cabashada taas oo lagu dhax sheegay dhageysiga nidaamka xaquuq dhoowrista, ilaa la gabagabeyo dhageysiga.

Hadii moowduuc lagu sheegay cabashada gobalka, horey loogu go'aamiyay dhageysi nidaamka xaquuq dhoowrista kaasoo la xiriira adiga iyo degmada, go'aanka dhageysigu wuu xirmayaa kadibna CDE waa inaay usheegtaa cabtaha natiijadaas. Ugu danbeyntii, cabashooyinka eedeynaya ku guul dareysiga in la hirgaliyo go'aan ka soo baxay dhageysi nidaamka xaquuq dhoowrista, waa inaay CDE du xalisaa.

Hababka nidaamka dhoowrista Xaquuqda

Qorshada Cabashada Nidaamka Xaquuqda Dhoowrista

Adiga ama degmada ayaa qorankaraa Cabashada Nidaamka Xaquuq Dhoowrista ayada oo la xushmeaynaayo arinkasta oo la xiriirta aqoonsiga, qiimeynta iyo wax- barasho uu u qalma geeynta cunugaaga, ama siinta FAPE cunugaaga.

Cabashada nidaamka xaquuq dhoowrista waa in logu aadiyaa sharci jabinta laga soo ashtakooday taasoo dhacday wakhti aan ka badneyn labo sano wakhtiga adiga ama degmadu aay ogaatay ashtakada asaaska u ah cabashada.

Labadan sano kuma khuseeyso hadii lagaa joojiyay codsi inaay keeyska maxkamad dhageysato, hadii degmadu kaa xanibtay akhbaar ahayd in adiga lagu siiyo, ama la sameeyay si khaldan u fahmid khaas ah taas oo keentay dhibka asaaska u ha cabashada.

Cabashooyinka nidaamka xaquuq dhoowrista waa in loo gudbiyaan Agaasimaha wax-barashada gaarka ah ee degmada waana in lagu daraa: (1) magaca iyo ciwaanka uu cunugu daganyahay;(2) magaca iskuulka uu cunugaagu dhigto;(3) sharaaxada dhibka (s), aay ka midtahay dhabta la xiriirta dhibka; iyo(4) xalka dhibka ee la soo jeediyay inta laga ogyahay. Hadii degmadu qoratay cabasho, koobibaa lagu siindoonaa.

Habab casri ah: CDE waxaay soo saartay habab casri ah si loo caawiyo waalidka, iskuulka degmada, iyo wakaaladaha dadweynaha Qoranaya cabashooyinka nidaamka xaquuq dhoowrista. Hababkan waxaa xataa laga helikaraa on-line at:

[http:// www.cde.state.co.us/spedlaw/inf.htm](http://www.cde.state.co.us/spedlaw/inf.htm). Koobiyada waa la helikaraa hadii lala xiriiro iskuulka degmada ee Morgan County Re-3 teelkeedan (970) 370-6130.

Ogeysiiska Naaquska, cabashada nidaamka xaquuq dhoowrida waxaa loo arki inuu buuxo ilaa aay degmadu iyo adiga aad xaakinka maxkamada ugu ogeysiisaan si qoraal ah in la aaminsanyahay in cabashadaadu aayna helin waxyaalaha daruuriga ah ee kor ku xusan.

Ogeysiiskan naaquska ama dhimananta waxaa lagusiin xaakinka dhageysanaya Shan iyo toban cisho gudahood markii lahelu cabashada. Shan maalmood gudahood markii lahelu ogeysiiska naaquska, xaakinka dhageysanaya go'aan ayuu ka samayn cabashada, ineey cabashada loo fuliyay sida sharcigu dhigaayo, waxuuna si dagdag ah uu kula socodsiin kooxaha aay khuseeyso cabashada qoraal go'aanka ah.

Jawaabta Degmada: Hadii aayna degmadu horey kuu soo dirin qoraal ogeysiis ah oo ku saabsan arinta aay ka koobantahay cabashada nidaamka xaquuq dhoowrida, degmadu toban bari gudahood markay hesho cabashada waxaay kuu soo direysaa jawaab aay ka midtahay: sharaxaad sababta aay degmadu u soo jeedisay ama u diiday inaay qaado ficilka lagu sheegay cabashadaada; sharaxaad fursado kale oo aay IEP du tixgaliyeen iyo sabaabha lo diiday fursadaha la diiday; sharaxaad qiimeyn kasta oo lagu sameeyay cunugaaga, feylka laga qoray cunugaaga ama warbixin iskuulka degmadu isticmaalay oo aay ku saleeyay qorshaha la soo jeediyay ama la diiday. Iyo sharaxaad waxa kalifey qorshaha ama diidmada aay degmadu soo jeedisay. Keeys kasta, degmadu toban cisho gudahood markaay hesho cabashada waxaay kuu soo diri jawaab taas oo si khaas ah uga hadleysa moowduca lagaga hadlay ogeysiiska maxkamada.

Saxida Cabashada: Cabashada nidaamka xaquuq dhoowrida waxaa saxikaraa kooxda qoratay cabashada, laakin kaliya hadii kooxda kale aay ku sheegto qoraal ogolanshaha saxitanka lana siiyo jaanis lagu xaliyo cabashada kulan xalin, ama xaakinka maxkamada uu bixiyo ogolansho kabacdi maalinta shanaad ka hor inta uusan bilaababnin dhageysiga cabashada nidaamka xaquuq dhoowrida. Hadii koox qorato cabasho saxid, wakhtiga maxkamada dhageysiga cabashada nidaamka xaquuq dhoowrida waxaa laga bilaabi wakhtiga cabasho saxida la qortay.

Diyaarahanshaha adeegyo sharci oo lacag la'aan ah ama qiimo hooseya: Markii la bilaabo dhageysiga u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrida, degmadu waay kuu sheegi adeeg-sharci kasta oo lacag la'aan ah, qiimo hooseya ama adeegyada kale ee la xiriira oo laga helikaro degaanka. Degmadu waxaay xitaa warkan ku siin adiga markasta oo aad codsato.

Habsocodka xalinta

Shan iyo toban maalmood gudahood marka la helo ogeysiiska u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrida, degmadu waa inaay iskugu yeertaa kulan adiga iyo xubnaha kooxda IEP ga ee cunugaaga, kuwaas oo si khaas ah xogogaal ugu ah dhabta laga ogaadey u cabashadaada nidaamka xaquuq dhoowrida. Adiga iyo degmadu ayaa wadada go'aansandoona midka kamid ah kooxda IEP ee imanaya kulanka. Kulankan waa in lagudaraa shaqsiyo leh awood go'aan gaarid oo ka socda degmada. Kulanka laguma darikaro qareen ka socda degmada ilaa aad aadna wadato qareen kuu dooda.

Ujeedada kulanka xalka waa inaad adigu ka doodo u cabashadaada nidaamka xaquuq dhoowrida, iyo dhabta gunta u ah cabashadaada, si aay degmadu uhesho fursad aay ku xaliso khilaafka.

Kulanka xalka muhiim ma ah hadii adiga iyo degmadu iskugu afgarataan si qoraal ah inaad deeystaan kulanka, ama adiga iyo degmadu aad ku heshiisaan inaad isticmaashaan dhaxdhaxaadiyaal sida ku qeexaan qormada dhaxdhaxadinta ee kor ku xusan.

Hadii xalka khilaafka la gaaro, adiga iyo iskuulka degmadu waa inaad si sharci ah ugu heshiisaan oo aad adiga iyo wakiilada degmadu ku wada saxiixdaan awooda degmada saxiixaas taas oo ka fulikara maxkamad kasta oo karti iyo awood xirfadeed wax xukumid leh ama CDE da. Hadii kooxuhu aay heshiisgaraan kulanka xalka dartiis, mid ka mid ah kooxda wuu ka bixkaraa heshiiska sadex cisho oo aayna ku jirin Axad iyo Sabti gudahood kadib marka la fuliyo heshiiska.

Hadii degmadu aayna ku xalinin arinta 30 maalmood markay hesho cabashada nidaamka xaquuq dhoowrida, dhageysiga cabashada xaquuq dhoowrida wuu dhici,

Waxaa jirta 45 maalmood oo loogu talagalay in lagu fuliyo dhageysiga maxkamada iyo go'aan soo saarida, taas bilaabanaysa markay 30 ka maalmood ee wakhtiga xalinta aay dhacdo, marka laga reebo kuwan soo socda.

Kaliya waxyaalaha aad adiga iyo iskuulka degmada ku heshiiseen in dhaxdhaxaadin la geeyo, ama in lagu daayo kulanka xalka, ku guul dareysigaaga inaad ka qeybgasho kulanka xalka waxuu dib udhigaya 30 maalmood ee wakhtiga xalka iyo 45 maalmood wakhtiga dhageysiga nidaamka xaquuq dhoowrista ilaa aad ogolaato inaad ka soo qeybgasho kulanka xalka.

Hadii kadib markii la sameysay dadaal macquul ah qoraal lagu sameeyay dadaalkaas, degmadu aaney awoodin inaay hesho ka qeybgalkaada kulanka xalka, degmadu waay sameynkartaa, ka dib dhamaadka wakhtiga 30 maalmood ee xalka, waay codsankartaa in masuulka dhageysanaya keeyska inuu xidho ama laabo cabashadaada.

Hadii degmadu ku guul dareeysato inaay qabto kulanka xalka lagu radinaayo 15 maalmood gudahood markaay hesho u cabashadaada nidaamka xaquuq dhoowrka ama aay degmadu ku dhacdo inaay ka soo qeybgaliweydo kulanka xalka lagu radinaayo, waxaad weydiinkartaa masuulka dhageysanaya keeyska inuu amro in 45 maalmood ee dhageysiga u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka uu bilaawdo.

Hadii adiga iyo degmadu si qoraal ah ugu heshiisaan inaad iska deeystaan kulanka xalka lagu radinaayo, 45 maalmood kadib waxaa bilaabin dhageysiga u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka.

Markay bilaabato dhaxdhaxaadinta ama kulanka xalka lagu radinaayo kadib, iyo inta ka horeysa dhamaadka 30 ka bari ee wakhtiga xalka, hadii adiga iyo degmadu aad ku heshiisaan qoraal inuusan heshiis suurtagal aheyn, maalinta ku xigta waxaa bilaabin dhageysiga cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka.

Hadii adiga iyo degmadu ku heshiisaan inaad isticmaashaan habka dhaxdhaxaadinta, dhamaadka 30 ka bari ee wakhtiga xalka, adiga iyo degmadaba waad ku heshiinkartaan qoraal inaad sii wadaan dhaxdhaxaadinta ilaa heshiis la gaaro. Sikastaba ha ahatee, hadii adiga ama degmadu aay ka labato heshiiska, 45 cisho ee dhageysiga cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka waxuu bilaabin maalinta xigta.

Hababka Dhageysiga keeyska

Dhageysiga keeyska waxaa fulin masuul dhaxdhaxaad ah, kaas oon ushaqeynin shaqalaha CDE ama degmada, kaasoon ka laheyn dan shaqsi iyo tu xirfadeed midna taasoo ka hor imaaneysa hadafkiisa ama hadafkeeda. Masuulka dhageysanaya waa inuu leeyahay cilmi iyo awood uu ku fahmo waxyaalaha uu bixiyo sharciga IDEA kaas oo la jaanqadaya shuruucda federalka iyo gobalka. Waa inuu masuulka dhageysanaya keeyska uu leeyahay awood uu ku fuliyo dhageysiga uuna bixiyo qorana go'amada si haboon oo ah sharciga. CDE waxaay joogteeyn liistada masuuliyiinta dhageysanaya iyo qoraalo ku saabsan wax-barashadooda, degmadu waxay masuuliyiinta dhageysanaysa keeyska u kala doorataa hab wareegto ah.

Dhinaca codsada dhageysiga cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka looma ogalaanayo inaay ku soo jeediso dhageysiga moowduucyo aan lagu sheegin cabashada, ilaa uu dhinaca kale ogolaado. Dhinaca kasta, ee cabashada dhageysiga nidaamka xaquuq dhoowrka waxuu xaq u leeyahay kuwan:

1. Inuu soo raaco lana taliyo la taliyo iyo shaqsi leh cilmi khaas ah ama tababar ayada oo la ixtiraamayo dhibabka ciyaalka ka dhiman xaga fahanka.
2. In la sheego cadeymaha kadibna wajahdaa dhanwalba laga eego, aayna qasbaan oo la raaco makhraatiyada xaadirka ah.
3. La mamnuco in lagu soo jeediyo cadeeymo dhageysiga kuwaas oo aan shaaca looga qaadin dhinaca kale ugu yaraan 5 maalmood ka hor intaanu dhicin dhageysiga.
4. In la helo dhageysiga oo qoraal qoran ah ama duuban.
5. In la helo koobi qoran ama duuban oo ah xaqiiqda keeyska iyo go'amada.

Waxaad xaq u leedahay inaad keento dhageysiga cunuga keeyska ku sabsanyahay, waxaadna xaq u leedahay inaad u ogolaato dadweynaha dhageysiga. Dhageysiga kasta waa in lagu fuliyo wakhti iyo meel taas oo si macquul ah ugu haboon adiga iyo cunugaaga. Ugu danbeystii qoraalka dhageysiga, iyo xaqiiqda keeyska waa in lagu siiyo lacag la'aan.

Shaac ka qaadida akhbaarta dheeraadka ah: ugu yaraan 5 maalmood oo maalmo shaqo ah wakhtiga dhageysiga, dhinac kasta waxaa qasab ku ah inuu shaaca uga qaado dhinaca kale dhamaan qiimeynaha iyo talooyinka ku wajahan qiimeyn kasta oo dhinacaas ugu talagalay inuu u isticmaalo dhageysiga. Masuulka dhageysanaya wuu xanibayaa soo jeedinteeda qiimeyn kasta ama talooyin kuwaas oo aan shaaca looga qaadin ugu yaraan 5 cisho wakhtiga dhageysiga ilaa uu dhinaca kale ogolaado in la soo jeediyo.

Ilaa uu masuulka dhageysanaya uu bixiyo kordhin wakhtiga oo aay codsatay dhinaca kale, go'aanka kama danbeysta ah ayaa la soo saari waana lagu soo diri wakhti aan ka badneyn 45 cisho kadib 30 ka cisho ee wakhtiga xalka.

Go'aanka waxaa loo sameyn si macno ku saleysan oo go'aan ah inuu cunugaagu helay FAPE.

Khilaafyada ku andacoonaya in lagu xadgudbay nidaamkii, masuulka dhageysanaya waxuu ogaan inuusan cunugaagu helin FAPE kaliya hadii ku xadgudubka nidaamka lagu andacoonayo xayirey xaqiiqadii cunugaaga ku helilahaa FAPE, si ahmiyad leh u xayirid fursadii aad kaga qeybgali laheyd kulamada go'aaminta, ama keenay ka xayuubin fa'idooyinkii wax-barasho.

Heerka cunugaaga wakhtiga nidaamka socto

Sida lagu bixiyay qeybta lagu magacaabay hababka edbinta ardeyda ka dhiman xaga fahanka moyeen, wakhtiga oo taaganyahay nidaam maamul iyo maxkamadeed ee cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka, cunugaagu waa inuu jooga booskiisa wax-barasho ee uu hada ku jiro ilaa adiga iyo degmadu ku heshiisaan. Hadii cabashadaadu la xiriirto codsi in cunugaaga la qoro iskuulka degmada. Cunugaaga, adiga oo ogolaanaya in cunugaagu la qoro iskuulada caadiga ah ee degmada ilaa uu ka dhamaado habka cabashada.

Hadii cabashada la xiriiro cunug kaas oo kasoo gudbaya qeybta C una gudbaya qeybta B ee sharciga IDEA umanaqalmo adeegyada qeybta C maxaayeelay asaga ama ayada waxay noqotay 3, degmada loogama bahno inay siiso adeega qeybta C taasoo cunugu helaayey. Hadii cunuga loo aqoonsado inuu uqalmo qeybta B, aadna ogolaato inuu cunugu helo wax-barasho khaas iyo adeegyada la xiriira. Degmadu waa inay siisaa adegyadaas ku waas oo aan la 'isku khilaafsaneyn.

Rafcaanka qadashada dhageysiga nidaamka xaquuq dhoowrka

Dib u eegida ama muraajaceyn maamul

Dhinaca uun ayaa rafcaan ka qaadankara go'aanka masuulka dhageysanaya keeyska xafiiska maamulka maxkamadaha 30 cisho gudahood marka go'aanka la helo. Hadii rafcaan laga qaadanwaayo, garsooraha ayaa ku sameyn dib u eegid dhaxdhaxaad ah dhageysiga:

1. Waxuu baari dhamaanba rikoodhka dhageysiga;
2. Inuu xaqiijiyo in hababka dhageysiga aay ku toosnaayeen waxyaalaha looga baahanyahay nidaamka xaquuq dhoowrka;
3. Inuu raadiyo cadeeymo dheeraad ah hadii aay lagama marmaan noqoto;

4. In awood loosiiyo dhinacyada fursad inaay ku doodaan af ama qoraal ama labaduba, iktiyaarka garsooraha meesha iyo wakhtiga dhinacyada wada qancinaya.
5. Inuu sameeyo go'aanka ugu danbeeya ee madax banaan markuu dhameeyo muraajicada kadibna waxuu u diri dhinacyada oo dhan 30 cisho gudahood kadib markii lahel codsiga dib u eegida;
6. Kadibna waxuu bixin koobi qoraal ah ama ikhtiyaarka waalidka, duubid xaqiiqda la helay iyo go'aanada loo diray dhinacyada.

Garsoorku waxuu leeyahay awood uu ku bixiyo saa'idin wakhtiga hadii uu midkamid ah dhinacyada codsado. Go'aanka uu sameeyo garsooraha maxkamada waa kama danbeeyn, ilaa dhinaca uu qorto in la qaado wax-qabad shacab.

Wax-qabad shacab

Dhinac kasta xaq ayuu uleeyahay inuu rafcaan ka qaato go'aanka garsooraha maxkamada, asaga oo u qoranaya wax-qabad shacab maxkamad gobal kasta oo leh awood Xirfadeed wax xukumid ama maxkamada degmada ee federalka. Dhinaca codsada ficilka ama wax-qabadka waxay heysataa 90 cisho laga bilaabo maalinta garsooruhu go'aanka gaadho inuu dhincaas rafcaanka qaato.

Ficil kasta oo qeybtan hoos timaada, maxkamadu waxaay helidoontaan qoraalada hababka socda ee maamulka; waxaay dhageysandoontaa cadeeymaha ayada oo la tixgalinaayo codsiga dhinaca.

Ayada oo ku saleyneysa go'aankeeda cadeeymaha, waxuu bixin go'aanka aay u maleysa maxkamadu inuu ugu haboonyahay.

Majiro wax ku qoran sharciga IDEA oo xadidaya xaquuqaha, hababka iyo xalalka diyaarka uu uga dhigay tastuurku dhinacyada, sharciga amerikanka meel ka dhiman, sharciga dhaqan toosinta ee 1973, ama sharciyada kale oo federalka ee ilaaliya Xaquuqda ciyaalka meel ka dhiman.

Si kastaba ha ahaatee, hadii uu dhinaca qorto wax-qabad shacab asaga oo cuskanaya hal ama sharciyo badan kuwaas oo raadiya xal laga helikaro xataa sharciga IDEA, dhinacaas waa inuu dhameeyaa cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka, kadibna maamulku waa inaay rafcaanka qaatan habka si dacwada loo hoos keeno sharciga IDEA.

Ajuurada qareenka

Ficil kasta markii la raaco sharciga IDEA, maxkamadu, ikhtiyaarkeda, waay ku abalmarinkartaa ajuro qareen oo macquul ah qeyb ahaan kharashka caadiga ah ee waalidka heysta cunug dhiman. Maxkamadu xataa waxaay ku abalmarinkartaa ajuro degmada taas oo ka dhan ah qareenka waalidka qorta codsi dhageysi maxkamadeed oo macano taro ah, aan macquul aheyn, ama sal iyo raad laheyn.

Ugu danbeyntii, maxkamadu waay ku abalmarinkartaa qareen ajuuro ka dhan ah waalidka ama qareenka waalidka, hadii codsigii dhageysiga maxkamada ee waalidku loogu soo jeediyay qorshe aan sax aheyn, sida dhibid, iyo dib u dhigid ama si aan muhiim aheyn u kordhin qiimaha dacwada.

Ajuuro qareenka lama siinayo kulamada xalka ama kulamada dhaxdhaxadinta uu ka qeybgalay oowgood. Waliba, ajuuroyinka la xiriira kulamada IEP lama bixinayo ilaa kulamadaas loo qabtay go'aan maxkamada kadib.

Ugu danbeyntii, ajuurada lama bixinayo waliba kharashyada la xiriira lama magdhowayo ficil kasta ama dacwo ku saleysan sharciga IDEA adeegyadeeda taasoo la qabtay kadib markii si qoraal ah loogu deeqay maslaxo:

1. Hadii balanqaaday la sameeyay wakhtiga uu qeexay qeynuunka nambarkiisa yahay 68 ee qeynuunada federalka ee dacwooyinka shacabka ama dhageysiga maxkamada ama dib u eegida ee keeyska dib u eegto gobalka wakhti kasta 10 maalmood ka hor intaan keeyska dhageysigiisu bilaabanin.
2. Hadii balan qabadkii aan la'ogolaanin 10 cisho gudahood
3. Hadii masuulka maxkamada dhageysanaya uu ogaaday in waxa aad heshay ugu danbeyntii uusan aad kaga wanagsaneyn balanqaadkii maslaxada.
4. Inkasta oo xadeynaha, ku abaalmarin ajuuro qareen iyo kharashyada la xiriira waa lagu sameynkaraa hadii guleysatay kadibna aad in badan ka cudurdaratay adiga oo diidaya maslaxada balanqaadka.

Maxkamadu waay ku abalmarinkartaa ajuuro qareen oo macquul ah ayada oo lagu saleeynaayo qiimaha caadiga ka ah bulshada. Guno lama isticmaalayo markii la xisaabinayo ajuurada lagu abaalmaryey. Maxkamadu xataa waay yareenkartaa, si haboon, qiimaha ajuurada qareenka ee lagu abaalmaryey, hadii maxkamadu ogaato in:

1. Adiga iyo qareenkagu wakhtiga aay dacwada socoto, si aan macquul aheyn inaad dib u dhigteen xalkii ugu danbeeyey ee khilaafka.
2. Qiyaasta ajuurada qareenka ee aan si macquul aheyn loo kordhiyey qiimaha sacadii ee caadiga ka ah bulshada adeegyada aay fuliyaan qareemada kale ee leh xirfada, sumcada iyo waayo aragnimada qareenkagu leeyahay oo kale.
3. Wakhtiga la isticmaalay iyo adeegyada sharciga ah ee al bixiyay aay aheyd dheeraad ayada oo la tixgalinaayo nooca aay tahay dacwada.
4. Inuu san siinin qareenka masuulka kaa ah iskuulka degmadu akhbaar ku haboon ogeysiiska codsiga nidaamka xaquuq dhoowrka sida lagu hoos qeexay ciwaanka cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka.

Si kastaba ha ahaatee, maxkamadu ma yareyneeyso ajuurada hadii aay maxkamadu ogaato in gobalka ama iskuulka degmadu aay si aan macquul aheyn dib ugu dhigeen xalkii ugu danbeeyey ee dacwada ama aay jireen ku xadgudub siinta qaabka ilaalin/dhoowrida ee ku xusan sharciga IDEA.

Edbinta Ciyaalka Dhiman

Hababka Khuseeya Edbinta Ciyaalka Dhiman

FAPE (wax-barasho lacag la'aan ah oo ku haboon cunugaaga) waa in diyaar looga dhigaa dhamaan ciyaalka u qalma ee ka dhiman xaga wax-barashada kuwaas oo laga saaray iskuulka (Tusaale, laga ceeyriyay ama laga joojiyay), isla maalinta go'aanka ficil edbinta ah la qaaday ayaa lagu ogeysiinayaa go'aanka iyo dhamaan hababka ilaalinta ee aay qormadan ka koobantahay, edbintaas oo keentay in cunugaagu iskuulka ka maqnaado in kabadan 10 cisho.

Meel ka badalid: Ciqaabta iskuul ka ceeyrintu ama ka joojinta waay dhacday hadii:

(1) cunugaaga iskuulka laga ceeyriyay 10 cisho oo isku xigta hal sanad dugsiiyeed gudahiis; ama (2) cunugaaga waxaa soo food saaray iskuul ka ceeyrin taxane ah taas oo kabadan 10 maalmood oo maalmo iskuul ah oo hal sanad iskuul gudahiis ah, kadibna iskuul ka ceeyrintii taxanaha aheyd ee keentay nidaam maxaayeelay dabecadii keentay iskuul ka ceeyrinta aay sibadan ula midtahay kuna haboonyahay sida waxyaalaha keena sida dheeranta ceeyrin kasta, inta koor ee cunuga iskuulka laga ceeyriyey, iyo isku dhodhowanta ceeyrimaha.

Hadii nidaamka ceeyrinta uu keenay meel badal, in aay degmadu u go'aamisay keeys keeys, iyo hadii wax adag ka horyimid, iyo hadii aay tahay in arinta dib loo fiiriyo sida lagu dhax qeexay qeybta rafcaan ka qaadashada edbinta ee hoose.

Cadeeynta Go'aanka: Kama danbeeynayso 10 cisho kadib go'aanka kasta oo cunugaaga boos badal ku keenaya sharciga akhlaaqda ardeyga oo uu jabiyay oowgeed, adiga iyo xubnaha aay khuseeyso ee kooxda IEP ayaa dib u eegidoona dhamaan akhbaarta la xiriira feylka cunugaaga, oo aay ku jirto IEP cunugaaga, faalo macalin kasta, iyo akhbaar kasta oo la xiriirta oo aad adigu bixisay si loo go'aamiyo hadii akhlaaqdu aay su'aal ka taagantahay: 1) waxaa keenay ama waxa la leh xiriir la taabankaro oo toos ah cunugaaga dhimanaantiisa xaga fahanka ah; ama 2) waa natiijada tooska ah ka dhalatay markii lagu guul dareeystay in la fuliyo cunugaaga IEP diisii. Hadii adiga iyo xubnaha aay khuseeyso ee kooxda IEP da aad go'aaminsaan inaay mid kuwan kamid ah aay haboontahay, akhlaaqda waxaa lagu go'aamin inaay cadeyn u tahay dhimananta cunugaaga.

Go'aaminta inaay dabeecadu aay aheyd Cadeeynta: Hadii la go'aamiyo inaay akhlaaqda su'aashu ka taagantahay aay tahay Cadeeynta cunugaaga dhimanaantiisa, Kooxda IEP da: waxaay fulin qiimeyn dabeecadeed waxqabad leh eeyna ku fuliso qorshe faragalin dabeecadeed ("BIP") cunugaaga, hadii aay degmadu horay u fulinin qiimeyntan oo kale; ama 2) dib u fiirisay BIP kadibna aay dib u habeeyn ku sameysay, sida lagama maarmaanka ah, inaay ka hadasho dabeecada moowduucu ku saabsanyahay. Waliba, hadii la go'aamiyo inaay akhlaaqda su'aashu ka taagantahay aay tahay najiijo toos ah oo ka dhalatay ku guul dareysiga in la fuliyo IEP, degmadu waa inaay qaadaa talaabo dagdag ah aay ku xaliso kafeeyn la'aanta. Ugu danbeyntii, ilaa isbadel ku meel gaar ah oo meeleyn ah aay haboonaato, ama aad ogolaato boos badalka, cunugaaga waxaa lagu celin booskii laga ceeyriyay.

Isbadel ku meel gaar ah oo wax-barasho: waxaa cunugaaga loo qaadikaraa isbadel ku meel gaar ah oo wax-barasho oo aay doorbiden kooxda IEP da 45 cisho gudahood ayada oo aan la tixgaliyeynin hadii aay akhlaaqda su'aashu ka taagantahay aay cadeyn u tahay dhimananta cunugaaga: (1) hadii uu ku qaato ama uu ku heeysto qori iskuulka (2) uu si ulakac ah uu heeysto ama uu isticmaalo daawo sharcidaro ah, ama uu gado walxaha sharcidarada ah asaga oo iskuulka jooga; 3) inuu si xun u waxyeelo jidhka ah oo dhaawac ah ugu geeysto qof kale asaga oo iskuulka jooga.

Rafcaan ka Qaashada Edbinta

Hadii aad ku gacanseeyrto go'aanka meeleynta ciqaabta ah ama go'aanka Cadeeynta, waxaad codsankartaa dhageysi degdeg ah. Sidoo kale, hadii degmadu aaminsantahay in ku sii heynta cunugaaga booskan in si la taabankaro ugu egtahay inaay dhaxlasiineyso cunugaaga dhaawac asaga ama kuwa kale kuyimaado, degmadu waay codsankartaa dhageysi degdeg ah.

Dhageysi kasta 20 maalmood oo maalmo iskuul ah ayuu dhici laga bilaabo wakhtiga la qorto cabashada kadibna go'aanka ayaa la soo saari 10 maalmood oo maalmo iskuul ah kadib dhageysiga maxkamada.

Marka cabashada rafcaan ka qaashada ciqaabta la qorto, kulanka xalku waa inuu ku dhaca 7 maalmood gudahood markaay degmadu hesho cabashada. Kulanka xalka waa la dhaafikaraa hadii dhinacyada ku wada ogolaadan qoraal. Hadii aan la dhaafin, dhinacyada waxay heystaan 15 maalmood laga bilaabo maalinta aay degmadu hesho cabashada si aay u xaliso arinta.

Masuulka dhageysanaya maxkamada kaasoo buuxiya sharuudaha loo dajiyo qeybta dacwo dhageysiga (fiiri kor) waa inuu fuliyaa dhageysiga cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka ayada oo la raacayo sharuudaha lagu xusay qeybtaas. Go'aanka masuulka maxkamadu dhageysanaya laga yaabe midkood inuu sameeyo:

1. Inuu ku celiyo cunugaaga booskii laga soo saaray, hadii la go'aamiyo inuu boos ka saarku inuu ahaa jabin waxyaalaha ku hoos xusan qeybta **Edbinta Ciyaalka Dhiman**, ama inaay cunugaaga dabeecadisa aay keentay dhimanaantiisa; ama
2. Inuu amro in booska laga badalo lana geeyo boos ku meel gaar ah oo ku haboon heerka wax-barashadiisa wakhti aan ka badneyn 45 maalmood hadii la go'aamiyo inaay sii joogida booska uu hada joogo cunugaagu aay u keeni cunugaaga ama kuwa kale dhaawac.

Markii adiga ama degmadu aay qorato u cabasho nidaamka xaquuq dhoowrka ee la xiriira arinta edbinta, cunugaagu waa inuu jooga booska wax-barasho ee ku meel gaarka inta la sugaayo go'aanka xaakinka dhageysanaya keeyska, ama ilaa uu ka dhaco wakhtiga booska saarka sida ku hoos xusan **Edbinta Ciyaalka Dhiman**, mid kasta oo horyimaado, dhinacyada mid uun baa rafcaan ka qaadankara go'aanka masuulka dhageysanaya keeyska si isku mid ah sida rafcaanka looga qaato go'aanada u cabashada nidaamka xaquuq dhoowrka. Fiiri qeybta rafcaanka, ee kor ku xusan.

Ilaalinta ciyaalka aan u qalmin sharciga IDEA

Hadii cunugaagu jabiyo sharciga akhlaaqda ardeyga, laakin aan la go'aamin inuu u qalmo adeegyo wax-barasho khaaska ah ee ku hoos xusan sharciga IDEA, cunugaaga waxaa awood loo siin inuu sharciga IDEA ga uu ilaaliyo hadii wakhtigii moowducan edbinta ee ka danbeeya sharciga uu jabiyay, degmadu, "aay ogeyd" hadii cunugaagu u aha cunug dhiman.

Degmada waxaa loo arkidoonaa "inaay ogeyd" hadii, ka hor akhlaaqdan keentay in ficilkan edbinta dhaco:

1. Waxaad si qoraal ah ugu sheegtay ahmiyada aad arintan siinayso inuu cunugaagu u baahanyahay wax-barasho khaas ah iyo adeegyada la xiriira supervisor, qof maamul ah ama macalinka cunugaaga;
2. Waxaad codsatay qiimeyn la xiriirta u qalmida wax-barashada khaaska ah iyo adeegyada la xiriira sida ku hoos qoran sharciga IDEA.
3. Macalinka cunugaaga, ama qof kale oo iskuulka degmada ka tirsan, uu sheegay ahmiyad khaas ah oo ku saabsan dabecad uu muujiyay cunugaagu si toos ah Agaasimaha wax-barashada khaaska ah ee degmada ama qof kale oo supervisor ah.

Degmada looma arkaayo "inaay ogeyd" hadii aad diiday inaad ogolaato degmadu inaay qiimeyso cunugaaga, hadii aad diiday adeegyada wax-barashada khaaska, ama cunugaaga waa la qiimeeyay kadibna waxaa la go'aamiyay inuusan aheyn cunug dhiman sida ku hoos xusan sharciga IDEA.

Hadi wakhtigii uu qadanayay ciqaabta ka dhanka ah cunugaaga, degmadu aayna ogeyn inuu cunugaagu ahaa cunug dhiman, cunugaaga waxaa lagu sameeyay ciqaab la mida ah ta loogu talagalay ciyaalka aan dhimaneyn kuwaas oo sameeyay ficil u dhigma kan uu cunugaagu sameeyay. Hadii, si kastaba ha ahaatee, aad sameysay codsi qiimeyn wakhtigii booskiisii wax-barasho laga saaray sababo edbin owgeed, degmadu waa inaay u qiimeysaa cunugaaga si dagdag ah. Ilaa qiimeynta la dhameeyo, cunugaagu waxuu sii joogi booskiisa wax-barasho aay go'aamiyeen masuuliyiinta iskuulka, taas oo aay ku jiri karto iskuul ka joojin ama ceeyrin adeegyo wax-barasho la'aan. Hadii la go'aamiyo in cunugaagu uu yahay cunug dhiman, ayada oo loo eegayo sharciga IDEA kadibna la raaco nidaamka edbinta ee lagu sharaxay buugan.

U gudbinta iyo wax-qabadka booliska ama masuuliyiinta maxkamada

Sharciga IDEA kama mamnuucayo iskuulka degmada ama degmada inaay uga war-bixiso danbi uu sameeyay cunug dhiman masuuliyiinta ku haboon, kamana celineyso masuuliyiinta booliska ama maxkamada inaay isticmalaan masuuliyadahooda ayada oo la tixgalinaayo sharciga gobalka iyo kan federalka ee danbiga uu sameeyay cunug dhiman. Hadii degmo aay ka war-bixiso danbi uu sameeyay cunug dhiman, waa inaay xaqiijiso koobiyadaas ah cunuga wax-barashadiisa khaaska ah iyo diwanada edbinta inaay masuuliyiintu u tabisay si tixgalin leh kuwa aay uga war-bixisay danbiga. Degmadu waay gudbinkartaa Koobiyada cunuga ee wax-barashada khaaska ah iyo diwanada edbinta kaliya hadii uu ogolyahay sharciga xaquuqda wax-barashada qoyska iyo sharciga xafidida sirta qofka.

